Hal abuurka Maxamed Xirsi Guuleed (Abdibashir)

Gu' waliba xusuus leh ,horaantii todobaatannadii waxaa maanka ku soo maaxaya sooyaalkii maansooyinkii Siinleyda,waxaana si tiiraanyeysan inoo horimaneysa dilkii foosha xumaa ee lagula kacey saraakiishii afgambigii 21 Oktoobar ,1969 u ahaa udub-dhexaadka,kalana ahaa; Maxamed Caynaanshe Guuleed, Salaad Gabayre Kediye iyo Cabdiqaadir Dheel. laguna toogtay fagaaraha Iskuula Boliisiyo iyadoo dadweynuhu ay daawanayaan.. Waxa kale ooy dhalashadiisu ku beegnayd abwaanka da'da yar ee Maxamed Xirsi Guuleed kuna caano-maalay "Cabdibashiir". Wuxu ku dhashey meesha lagu magacaabo Xaska-xiggale oo aad ugu dhaw tuulada Waabacado. Degaankaas oo ah dhul baadiye ah hawl maalmeedkiisuna ku dhamaado xoolo raacid sida maqasha, adhiga, geela iwm, caweyskana lagu qaato ciyaar soomaalidii kala duwaneyd ayaa Maxamed hanaqaadkiisii iyo kobaciisiiba qayb libaax ka qaadatey raad weynna ku sameysay markuu intaba yaraan kula wadaagey bulshada degaankaa.

Wuxu Eebbe -Isagaa xumaan ka hufan sarreeyena ahee- abwaan Maxamed deeq u siiyey oo uu yaraan ku hantey aqoonta af soomaaliga ee hodanka ah oo uu ka soo dheegtay ciyaar soomaalidii garabsocotey korniinkiisa. Waxaase iyadana tilmaan mudan inuu hiddo raacna ku ladhey deeqdaas oo aabihii iyo awoowgiiba curin jireen maansoyinka.

Xilli ku beegan 1984kii, asaga oo ka adkaaday maqal raacidda iyo adhi raaciddaba ayuu u soo wareegay xagga magaalada Hargeysa. Markaa waxa abwaanka u suurtogashey inuu u baydho barashada Quraanka, afka carabiga ,farta Soomaaliga ilaa uu intaba awood uga yeeshay inuu si fiican u barto una hanto aqoontooda, iyadoo xilliyadan dalka dhibaato ka taagneyd lagala kulmeyey maamulkii keligii taliyaha ahaa ee Soomaaliya ka jira wakhtigaas.

Maxamed wuxuu ka mid noqday ardeydii malcaamadii Aw-Jaamac ee xaafadda xidigta ku taallay halkaas oo uu Quraanka iyo luqadda carabiga ku bartay. Dhinaca diinta wuxu ku bartey masaajiddada kala duwan ee magaalada Hargeysa, sida Masaajid jaamaca weyn, masaajidka sheekh Bashiir, masaajidka Al-taqwaa ee Total ku yaal, masjid-nuur, masaajidka jameecada, masaajidka Ina Idiris, masaajidka Ina Bootaan, masaajidu nakhli iyo masaajiddo kale, haba ugu muhiimsanaado masjidul-taqwaa oo ahaa xaruntii sheekhiisa 1aad, Sheekh Cismaan-laangadhe

Gu'gii 1994kii Maxamed Xirsi waxa u suurto gashey inuu helo fursad uu ugu baqoolo dalka Sweden. Halkani ayey aheyd meel uu Maxamed ka sii ambaqaado hamigiiisii waxbarasho-korodhsiga ku ladhnaa kana bilaabey dugsiga sare ilaa uu ka gaadhey heer jaamacideed oo uu ku qaatay dalka Sweden. Jaamacadaha Umeå university iyo stockholm university ayuu ku qaatay culuumta siyaasadda iyo dhaqaalaha iyo weliba koorsooyin la xidhiidha culuumta etnologi.

Dhinaca curinta maansooyinka , Markii ugu horraysay ee Maxamed Xirsi Guuleed tiriyo wax gabay u eeg waxay ahayd mar uu ahaa sagaal jir. Isaga oo adhi la jooga ayaa lagaga tegey adhigii iyo walaashii oo yar oo laba jir ahayd. Adhigu uma joogahayn oo daaqa ayuu ku kala faafayey. Inanta yarna muu qaadi karahayn. Haddii uu adhiga is yidhaa soo rog, yarta ayaa oyda. Marka uu ku soo noqdana way faraxdaa oo way qososhaa. Markaas ayuu isagoo xaaladdaas cabbiraya tiriyey gabay uu ka mid ahaa beydkani: **"SHUKRIYEEY ADAA KALA SHIRRABI SHEEKADIYO REENKA".**

Isagoo Maxamed isla baraadla' oo gabaygaas akhriyaya ayey walaashii oo ka weyni u dhabbo gashay. Markaas ayey dadkii uga sheekaysay gabaygii iyadoo kollayba waxna ku kordhisay. Qajilaad iyo xishood ayey ku abuurtay in gabaygiisa sheeko laga dhigtay. Maxamed mar danbe laguma maqal gabay ilaa uu waynaaday. Balse wuu xiisayn jiray suugaanta maqalkeeda iyo marinteedaba oo dhadhan ayey u lahayd.

Sanadkii 1993 ayuu gabayadiisii ugu horreeyey allifay. Sababta wakhtigaas ka keentay allifaadda lama caddayn karo. Hase yeeshee waxaa la malayn karaa, duruuf adag oo abwaanka iyo umaddaba wakhtigaas haystay darteed. Gabayadii Maxamed Xirsi ee ugu

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

horreeyey badi lama hayo, sababtoo ah fursad iyo awood lagu diiwaangeliyo looma helin, isaguna xaafid ma aha. Laakiin wixii ka dambeeyey 1994 waa la diiwaangeliyey oo qiyaastii 90% way kaydsanyihiin. Gabayada wixii ka horreeyey 2004, waxa lagu ururiyey buugga lagu magacaabo; Shirrabid Hal abuur oo soo baxay isla 2004. Waxa isla buuggaas ku jirta riwaayad ka mid ah kuwa uu qoray abwaanku.

Markuu degay abwaanku dalkaa Sweden waxaa u suurtogashey inuu qalinka hawlgaliyo oo uu qoro buugaag dhawr ah tirana ilaa iminka gaadhay sagaal buug, kuna saabsan dhinacyo badan oo nolosha bulsho weynta Soomaaliyeed taabanaya,ay haboonaan laheydna in wehel laga dhigto

1. **DA'YARTA SOOMAALIYEED EE SWEDEN, DHIBAATOOYIN IYO XALKOODA**, 2000 (waa daraasad lagu sahamiyey xaaladaha ay ku suganyihiin da´yarta Soomaaliyeed ee u soo qaxay Sweden, dabcan waa la mid kuwa waddamada kale ee reer galbeedkuna)
2. **RAGGA TOODII ARAGNAYE DUMAR TALO MA LAGA DEYEY**, 2002 (waa sheeko curis ah oo sharrax taariikheed ka bixinaysa meesha laga raacay Soomaalida sida xalku noqon karo
3. **SHIRRABID HALABUUR, SUGAANTA M XIRSI**, 2004 (waa diiwaan lagu ururiyey suugaanta Maxamed Xirsi, wixii ka horreeyey 2003)
4. **WAA MAXAY WAXANI?** 2005 (waa buug carruureed laba luqadoodle ah turjumid, somali/Swedish oo sawirro ah)
5. **CAQIIDADA ISLAAMKA, SU'AALO IYO JAWAABO**, 2006 (Waa kitaab ka kooba 246 su´aalood iyo jawaabahooda oo lagu faahfaahinayo arkaanul-iimaanka. Si sahlan ayey wax uga baran karaan carruurta iyo dadka aan diinta hore ugu baran af-carabiga)
6. **EREYO ISKU LIDDI AH**, 2006 (waa buug carruureed laba luqadoodle ah, turjumid: somali/swedish oo sawirro ah)
7. **GOOBJOOGE: QISADII AL-ITIXAAD IYO CABDULLAAHI YUUSUF,** 2007(Waa qiso taariikeed haddana u qoran hab sheeko ah oo ku saabsan dagaalkii 1992 dhex maray al-itixaad iyo Cabdullaahi. Waa warbixintii iyo dareenkii wiil yar oo goobjooge ahaa)
8. **ISDAAHIRINTA MUSLINKA, SU'AALO IYO JAWAABO** 2007(Waa kitaab dabasocda kitaabki caqiidada oo isagu ku saabsan sida qofka muslinka ahi isu daahirinayo. Wuxu ka koobanyahay 222 su´aalood iyo jawaabahooda)
9. **AMIIRO MALMALAADO 2008 (**waa sheeko barbaarineed carruurta ah, turjumid**)**

Suugaanta Maxamed Xirsi Guuleed ee aannu ku soo bandhigi doono booggan farshaxan.com, waa wixii hore iyo waxa cusub ba.

- Suugaanta halganka iyo hiilka walaalaha Soomaaliyeed
- Suugaanta duruufaha qurbaha iyo dayacanka bulshada
- Suugaanta xagga dhaqanka iyo afka Soomaaliga
- Suugaanta dhinaca siyaasadaha Soomaalilaand
- Suugaan qubane ah oo kala duwan

Isku dubaridkii iyo habeyntii:

Fu,aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan
http://www.farshaxan.com

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.